




# Back-to-School Forms Paper Version – 2024-2025 (Somalia)

Only one parent or guardian in each primary household should complete Back to School Forms. A primary household is the address in which the student primarily lives. If a student requires a legal name change, please complete the form located at [spps.org/about/departments/equity/out-for-equity/gender-inclusion-policy](https://spps.org/about/departments/equity/out-for-equity/gender-inclusion-policy) or contact the Student Placement Office at 651-632-3700.

- Please complete B2S Forms online if you have access to the Internet. Directions begin on the next page.
- Please do not complete and return this packet if a guardian in your household previously completed B2S Forms online.

## Back-To-School (B2S) Forms Overview:

- Log in to Campus Parent to determine if you already completed B2S Forms. Then, click **More** and **B2S Forms**. If you see a date submitted then you have completed it for this year.
- Complete and return the **B2S Forms Household Form** only if you have changes to your household address or emergency contact information. Only one **Household Form** is required per household and can be returned to any of your student's schools.
- **Important:** You will need your One Stop username and password to complete B2S Forms online. Go to [spps.org/families](https://spps.org/families) and click **Reset/Recover Username or Password**.



## Complete Back to School Forms (B2S) Online

Go to [spps.org/families](https://spps.org/families). Note: Completing B2S Forms on a laptop or desktop computer is preferable. However, using an Android or Apple mobile device with current browser apps (Chrome and Firefox) is usually successful.

- Click the **Campus Parent** button.
- Enter your One Stop parent username and password.
- Click **Log In**.
- Select the link, **Click here to begin B2S Forms**

## Username and/or Password Help

**Online:** Go to [spps.org/families](https://spps.org/families) and click **Reset/Recover Username or Password**.

**Note:** You must have your email address or phone number listed in your child's school records.

## Technical Assistance

- **Online:** Visit [spps.org/families](https://spps.org/families)
- **By Phone or Email:** Refer to [spps.org/families](https://spps.org/families) and the school directory links for contact information.

## 2024-2025 Back to School Forms

Student ID: \_\_\_\_\_ Student Last Name \_\_\_\_\_ Student First Name \_\_\_\_\_ Grade \_\_\_\_ Birth Date \_\_\_\_\_ Current School \_\_\_\_\_

### **Sharciga Protection of Pupil Rights Amendment (PPRA)**

### **OGEYSIISKA DIIDMADA KA QAYB-QAADASHA BARNAMIYADA ISKUULKA QAARKOOD**

Sharciga Protection of Pupil Rights Amendment (PPRA), 20 U.S.C. § 1232h, ayaa wuxuu ka dalbanayaa **Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul** in ay ku war-galiyaan waalidiinta/masuulyiinta in ay ilmahooda ka reebi karaan ka-qayb-galka barnaamijyada iskuulka qaarkood. **Waxyaabaha ay waalidiintu ka reebi karaan ilmahooda waxaa ka mid ah ra'yi uruurinta ka kooban mid ama in ka badan mowduucyadan soo socda.**

Sharciga Protection of Pupil Rights Amendment (PPRA) wuxuu sidoo kale khuseeyaa aruurinta, wadaagga, ama isticmaalka macluumaadka ardayda oo loo adeegsado nidaamyo la xiriira horumarinta ama baaritaanada caafimaad qaarkood.

Ardayda waxaa laga codsanayaa inay sameeyaan talo-bixin ku aaddan mowduucyo kala duwan ee xilligii uu socday sannad-dugsiyeedka iyadoo adeegsanaya ra'yi-uruuriyeyaal. Ra'yi-uruurintu waxay ka imaan doontaa laba meel:

1. Degmada Saint Paul Public School District (sannadle ah)
2. Xafiiska The Minnesota Student Survey - ra'yi-uruuriye magaca ardayga la qarinayo oo gobolka oo dhan ah kaasoo ku saleysan waayo-aragnimada ardayga ee ku aaddan iskoolkiisa (saddexdii sannadba mar)

Sida uu dhigayo xeerka SPPS, waalidiinta/masuulka waxaa xilli hore la ogeysiin doonaa ra'yi-uruurin walba oo ardayga loo soo dirayo oo waxayna fursad u heli doonaan inay ardaydooda ka joojiyaan buuxinta ra'yi-uruurinta sida ay hadba waalidku u arkaan inay lagama maarmaanka tahay.

Iyadoo kala tashatay waalidiinta, SPPS waxay qaadatay sharciga 521.00 – *Student Surveys* si loo qeexo xuquuqda ardayda iyo qoysaska. Nidaamyada la xiriira sharciga 521.00 .1 wuxuu sidoo kale taageerayaa dhaqan-galinta nidaamkan. Labadan dukumiintiba waxaa laga heli karaa bartan: <https://www.spps.org/Page/31920>

### **RELEASE OF STUDENT DATA NOTICE TO PARENTS – MINNESOTA LIBRARIES (Library GO)**

**Library Go** waa barnaamij/nidaam Maktabadaha Dadweynaha ee Saint Paul lagaga heli karo buugaag, muusiko, caawinta shaqada-guri ee ardayda iyo waxyaabo kale oo badan iyadoo la adeegsanayo internet-ka. Marka uu arday walba oo dhigta Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul uu leeyahay fasax uu ku gali karo macluumaadka maktabadaha dadweynaha, macallimiinta waxaa u fududaanaysa inay waxyaabo cusub oo casri ah la fal-galiyaan fasalka iyo maktabada. Dhammaan ardayda Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul waxaa la siiyaa lambar ay kaga qayb gali karaan barnaamijka Library Go haddii uusan waalidku diidin.

Maktabadda dadweynaha waxay heshaa liiska xogaha iyo cinwaanka guriga ardayga, taleefanka guriga, aqoonsiga ardayga iyo iimaylka ardayga iyadoo u helayso qaab aamin oo onlayn ah. Haddii aad rabtid inaad ka baxdid adeegga maktabadda ee **Library Go**, booqo [spps.org/studentrecords](https://www.spps.org/studentrecords) si aad u dooratid foomamka oo u heshid tilmaamaha meesha aad u diri doontid.

### **UNPAID MEAL CHARGES** (The policy will also be posted on the District's website.)

Calaamadee sanduuqa hoose (hoos u dhaadhac) si aad u xaqiijiso inaad dib u eegtay kuwan soo socda: Siyaasadda Kharashka Cunnada Aan La Bixin (Siyaasadda Guddiga SPPS 534.00 EE CUNTA AAN LA BIXIN). Kadib dhagsii xiga.

La diwaan galiyay: 7/17/2018 Xeerarka Dugsiyada Dadwaynah ee Saint Paul 534.00 Dib loo Saxay: 12/13/2022

534.00 LACAGTA CUNTADA EE AAN LA BIXININ

## 2024-2025 Back to School Forms

Student ID: \_\_\_\_\_ Student Last Name \_\_\_\_\_ Student First Name \_\_\_\_\_ Grade \_\_\_\_ Birth Date \_\_\_\_\_ Current School \_\_\_\_\_

### 1. UJEEDDO

Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul (SPPS) waxay aaminsanyihiin in ardayda sida wanaagsan loo nafaqeyay ay u diyaarsanyihiin inay wax bartaan. U'jeeddada xeerkani waa in la hubiyaa in ardayda SPPS ay helaan cunno nafaqaysan oo caafimaad ah iyadoo loo soo marinayo Barnaamijka Nafaqada Carruurta, islamarkaana ay iskuullada, shaqaalaha iyo qoysasku ay isku si u fahamsanyihiin uguna xisaabtamayaan qimaha iyo kharashaadka cunnada. Xeerkani wuxuu sahlayaa in la xakameeyo in la ogaado ardayda uu qarashka u yaallo yar yahay, in meesha laga saaro in ardayda aan iska bixin karin kharashka cunnada lagu ceebeeyo, islamarkaana la hubiyo in iskuulladu helaan kharash ay ku dabaraan barnaamijka nafaqada ardayda.

### 2. BIXINTA LACAGTA CUNTADA

- Sanad walba, qoysasku waa inay buuxiyaan Foomka Macaashka waxbarashada/Cuntada Lacag la'aanta ah ama Qiimaheeda la Dhimay.
  - Qoysaska hela waraaq sheegaysa inay xaq u leeyihiin oo si toos ah loo aqoonsaday inay heli karaan cuntada lacag la'aanta ah ama qiimaheeda la dhimay inta ka horreysa bisha Sebteembar 1, uma baahna inay soo buuxiyaan arjiga macaashka waxbarashada.
  - Siyaabo kala duwan ayaa qoysaska loogu diyaarin doonaa arjiyada sida in boostada ama email ahaan loogu soo diro ka hor billowga sanad-dugsiyeedka, ama in la dhigo xafiiska iskuulka, ama barta internet-ka ee Waaxda Nafaqada, ama in laga dalban karo Waaxda Cunnada.
  - Qoysasaka u baahan in laga caawiyo buuxinta arjiga waxay la xiriiri karaan Waaxda Cunnada ama xafiiska iskuulkooda.
- Lacag ayaa lagu shubi karaa santuuqa cunnada ee ardayga iyadoo la isticmaalayo lacag caddaan ah, jeegag ama kaararka bangiyada. Habka loo bixiyo lacagaha cunnada waxaa laga heli karaa barta internet-ka ee Waaxda Cunnada ee SPPS, ama waxaad ka ogaan kartaa xafiiska iskuulkaaga.
- Dhammaan ardayda waxaa la siinayaa cunto sida jadwalka cuntada ku qoran iyadoon loo eegaynin in santuuqoodu maranyahay ama lacag ay ku jirto.
  - SPPS waxay aaminsanyihiin in ay ku jirto danta dhammaan bulshada iskuulladeena in arday kasta uu helo cunto nafaqaysan.
  - Ardayda loo go'aamiyay inay heli karaan cuntada lacag la'aanta aha ama qiimaheda la dhimay ee ka diwaan-gashan barnaamijka Community Eligibility Provision, waxay helayaan cunto dib loo bixin karo xitaa haddii uu santuuqoodu maranyahay ama lacag la'aan yahay.
  - Haddii arday lacagta cuntada lagu leeyahay, jawaab-celintu waxay noqonaysaa sida lagu sharaxay qeybta hoose ee IV.
  - Ma jiri doono cunto si tafaariiq ah loo dalban karo ilaa ay ardayga santuuqiisu ku jirto lacag ku filan kharashka cuntada.
- Marnaba ma dhici karto in arday lagala noqdo cunto la siiyay.

### 3. OGEYSIINTA MARKA LACAGTA CUNTADA EE ARDAYGU DHAMAATO AMA YARAATO

- Marka lacagta ku jirta santuuqa ardayga ay yaraato ama dhamaato, waxaa la qaadaa tallaabooyinka soo socda si waalidka/masuulka loo ogaysiiyo:
  - Marka uu santuuqa cuntada ee ardayda dugsiyada hoose gaaro in lagu yeesho kharash dhan labo cunto, macallinka ardayga ayaa loo sheegaa inuu akhbaar u diro waalidka/masuulka oo loogu sii dhiibo ardayga.
  - Dhammaan ardayda SPPS:
    - Marka uu santuuqa cuntada ee ardayda dugsiyada hoose gaaro in lagu yeesho kharash dhan shan cunto, waxaa waalidka farriin cod ah loogu diraa telefoonka.
    - Marka uu santuuqa cuntada ee ardayda dugsiyada hoose gaaro in lagu yeesho kharash dhan shan cunto, Xafiiska Waaxda Nafaqada ayaa waalidka u diraa waraaq, iyadoon la faafinaynin laakiin si asturan oo ixtiraam ku jiro ayaa loogu diraa.
    - Marka uu santuuqa cuntada ee ardayda dugsiyada hoose gaaro in lagu yeesho kharash dhan toban cunto, waxaa la ogeysiiyaa maamulaha iskuulka. Shaqaalaha iskuulka ayaa la hadla waalidka ardayga si ay u qiimeeyaan baahida qoyska una caawiyaan, islamarkaana u dalbadaan in la bixiyo lacagta cuntada.
- Xusuusinta ku aaddan bixinta baaqiga cuntada ee ardayga lagu leeyahay hoos uma dhigeyso ama ma ceebayn doonto arday walba oo ka qaybqaadanaya barnaamijka qadada dugsiya, baaqigaas oo ay ku jiraan, laakiin aan ku koobneyn, daadinta cuntada, ka noqoshada cunto ardayga la siiyay, kaga dhawaaqidda ama ku qorida magacyada ardayda meel fagaare ah, ama ku dhejinta magacyada ardayda istiikaro, istaambooyin, ama biinanka.

### 4. LACAGTA CUNTADA EE AAN LA BIXININ

- Dadaalka loo galayo in lagu bixiyo lacagaha cuntada ee lagu leeyahay ardayda marnaba ma fuquuqayaan mana ceebaynayaan ardayga.
- Degmadu waxay ku dadaali doontaa inay qoysaska la xiriirto sidii loo xallin lahaa bixinta lacagaha cuntada. Qoysaska waxaa lagu dhiirri galinayaa inay soo buuxsadaan arjiga cunnada lacag la'aanta ah ama qiimaheeda la dhimay si ay ilmahoodu u helaan cunto. Qoysasak horay u buuxiyay arjiga ee uu ku yimid qoyskooda is-baddal xooggan oo dhinaca tirada sida dhalasho ilmo cusub ama is-baddal dhaqaale waa inay mar labaad soo buuxiyaan arjiga. Qoysaska ay ku adag tahay inay iska bixiyaan lacagta cuntada waxay la soo xiriiri karaan Waaxda Nafaqada si loogu sameeyo qorshe ay iskaga bixiyaan lacagta cuntada.
- Degmadu waxay dadaal ku bixin doontaa inay soo xarayso daymaha lacagta cuntada; laakiin, marka dadaalkani keeni waayo wax natiijo ah oo uu lacagta soo xarayn waayo, daymaha waxaa dib loogu soo celiyaa iskuulka waxaana laga soo jaraa miisaaniyadda iskuulka si loogu bixiyo lacagta cuntada.
- Degmadu marna kama qeybgalin doonto kamana dalban doonto in qof aan ka tirsanayn shaqaalaha degmada uu soo aruuriyo daymaha lacagta cuntada, sida dad samaynaya tabarugaad ama shirkadaha daymaha soo aruuriya.
- SPPS ma soo rogi doonto xayiraad kale oo ka mamnuuc ah sida uu dhigayo Xeerarka Minnesota qaybta 123B.37 sababo la xiriiro baaqiga cuntada ardayga oo aan la bixin. SPPS sababo la xiriiro baaqiga cuntada ardayga ee aan la bixin awgood uma xaddidi doonto ka qayb galka ardayga ee hawlaha iskuullada, xafladaha qalin-jabinta, safarada gaaban ee waxbarasho, ciyaaraha fudud, naadiyada ardayda, ama hawlaha kale ee manhajka ka baxsan ama helitaanka agabka, tignoolajiyada, ama alaabta kale ee la siiyo ardayda.

## 2024-2025 Back to School Forms

Student ID: \_\_\_\_\_ Student Last Name \_\_\_\_\_ Student First Name \_\_\_\_\_ Grade \_\_\_\_ Birth Date \_\_\_\_\_ Current School \_\_\_\_\_

### 5. XEERKA KU AADDAN XIRIIRKA

1. Xeerkan iyo dhammaan macluumaadka kale ee ka hadlaya hawshan waxaa lagu diyaarin doonaa qaab qoraal ah (sida; in lagu soo diro boostada, email, buugga back-to-school, buugga gacan-qabsiga ee ardayda, tababarka shaqaalaha, iwl.) waxaana loo gudbin doonaa:
  1. Dhammaan qoysaska ka hor intuuusan billaabanin sanad-dugsiyeed kasta;
  2. Ardayda iyo qoysaska u soo baddasha iskuullada dagmadeena, xilliga lagu jiro diwaan-galinta; iyo
  3. Dhammaan shaqaalaha iskuullada ee degmada ee masuulka ka ah hawlaha diiwaangalinta.
2. Sidoo kale, xeerkan waxaa lagu daabici doonaa barta internet-ka ee Degmada.

TIX-RAACA SHARCIYADA

Minn. Stat. § 123B.37 (Prohibited Fees) Minn. Stat. § 124D.111, Subd. 4

42 U.S.C. § 1751 *et seq.* (Healthy and Hunger-Free Kids Act) 7 C.F.R. § 210 *et seq.* (School Lunch Program Regulations) 7 C.F.R. § 220.8 (School Breakfast Program Regulations)

USDA Policy Memorandum SP 46-2016, Unpaid Meal Charges: Local Meal Charge Policies (2016)

USDA Policy Memorandum SP 47-2016, Unpaid Meal Charges: Clarification on Collection of Delinquent Meal Payments (2016)

USDA Policy Memorandum SP 23-2017, Unpaid Meal Charges: Guidance and Q&A

TIX-RAACA SHARCIYADA KALE:

Policy 533.00 – Wellness

## **Wargalinta Sanadlaha ah ee Annual AHERA Asbestos Notification**

1987, waxaa hirgalay Sharciga lagu magacaabo Federal Asbestos Hazard Emergency Response Act (AHERA) sharcigaan oo skuulada degmooyinka shardi kaga dhigaya inay isku duba ridaan oo hirgaliyaan qorshe lagu xakamaynayo walaxda loo yaqaan asbestos. Sharcigaani wuxuu shardi ka dhigayaa in shaqaalaha, ardayda iyo/ama waalidiintooda/masuuliyiintooda hab sanadle ah lagu wargaliyo halka uu marayo qorashaha maaraynta hawlaha lagula tacaalayo maadada asbestos ee ay ka midka yihiin baadhitaanada maadada asbestos iyo hawlaha ay qabtaan qolyaha loo xilsaaray inay ka jawaabaan dhibaatooyinka ay keento maadada asbestos. Haddii aad su'aalo qabtid, fadlan iimayl u dir [esg@spps.org](mailto:esg@spps.org).

## **SUNTA CAYAYAANKA EE ISKOOLLADA**

Sida ku xusan Sharciga Minnesota § 121A.30, **Sunta Cayayaanka ee Iskoollada lagu Buufiyowaa** arrin u baahan in dugsiyada ay bixiyaan ogeysiis qoraal ah oo sannadle ah kaasoo loogu talagalay waaliddiinta/masuuliyiinta iyo shaqaalaha ku saabsan markii iskoollada la keeno kiimikada noocyadeeda kala ah Herbicide, Pesticide, Insecticide & Fertilizer.

Haddii aad jeclaan lahayd in lagu ogeysiyo ka hor intaan la sameyn wax buufin ah maalmaha aan ka ahayn kuwa lagu xusay jadwalka qiyaasta ah (marka laga reebo buufinta degdegga ah), fadlan la xiriir iskoollada ilmahaaga si laguugu soo diro foom. Haddii aad codsaneysid ogeysiis adigoo adeegsanaya Boostada Mareykanka, fadlan soo dir bashqad leh istaambada boostada oo shaabadaysan oo cinwaanka gurigaaga ku qoran yahay.

## 2024-2025 Back to School Forms

Student ID: \_\_\_\_\_ Student Last Name \_\_\_\_\_ Student First Name \_\_\_\_\_ Grade \_\_\_\_ Birth Date \_\_\_\_\_ Current School \_\_\_\_\_

### **ILMAAMAHA AMMAANKA BASKA EE SAINT PAUL PUBLIC SCHOOLS**

Dugsiyada Saint Paul Public Schools waxay adeegyo gaadiid siiyaan ardayda dhigato SPPS iyo barnaamijyo kale ama aaddo iskoollada aan aheyn kuwa dadweynaha, iyo qaar ka mid ah iskoollada jaartarka ah, ee ku yaal gudaha Magaalada Saint Paul. Gaadiidka waxaa la siiyaa ardayda buuxisa shuruudaha u-qalmidda ee ku xusan Xeerka Guddiga Waxbarashada ee U-qalmidda Gaadiidka Ardayda (Board of Education Policy 707.00, Eligibility for Student Transportation).

### **Diiwaanka Ardayda iyo Xuquuqda aad Leedahay**

Ogaysiis ku Saabsan Xuquuqda Xeerka FERPA Iyo Kan Dowladda Gobolka Minnesota Ee Ku Aadan Macluumaadka Ardayda Xeerka xuquuqda Qoysaska ee ku aaddan Waxbarashada Macluumaadka gaarka ah ee Ardayda ee marka la soo gaabiyo loo yaqaano FERPA iyo midka dowladda gobolka Minnesota ee ku saabsan ilaalinta macluumaadka gaarka ah ayaa waxay waalidiinta iyo ardayda ay da'dooda tahay 18 sano jir iyo wixii ka weyn siinayaan xuquuq dhowr ah oo ku saabsan daalacashada iyo wax-kabedelidda diwaanka waxbarasho ee ardayda. Xuquuqahaasi waxaa ka mid ah:

- In ay xuquuq uleeyihiin in ay baari karaan ama dib u eegi karaan diwaanka waxbarasho ee ardaydooda 10 cisho gudaheeda markii aay soo codsadaan.
- In ay xuquuq u leeyihiin in ay codsadaan in diiwaanka waxbarasho ee ardaydooda dib loo saxo.
- In ay xuquuq uleeyihin in ay bixiyaan codsi qoraal ah ka hor inta uu iskuulka soo shaacinin macluumaad marka laga reebo ilaa xadka uu sharcigu u fasaxayo siidaynta macluumaadkaas codsi la'aan.
- In ay xuquuq uleeyihiin in ay gudbiyaan dacwo ka dhan ah Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul oo ku saabsan xadgudub ku aaddan xeerka FERPA

### **Ogeysiiska Xogaha Tasmada**

Xogaha tusaha ku qoran waa kuwo dadweynaha arki karaan oo waana la bixin karaa oggolaansho la'aan. Dugsiyada Saint Paul Public Schools waxay u qoondeeyeen xogaha soo socda inay yihiin kuwo tusaha ku qoran ee la arki karo: Magaca, taariikhda dhalashada, fasalka, iskoolka, taariikhaha diiwaangelinta, abaalmarinta, iyo xogaha hawlaha baxo saacadaha iskoolka ka dib. Ujeeddada xogaha buugga waa in loo oggolaado Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul in ay xogaha diiwaanka waxbarashada ilmahaaga geliyaan daabacaadaha degmada iyo dugsiya sida buugaagta sanadlaha ah, maamuusidda ardayda ku fiican tacliinta iyo liisaska kale ee aqoonsiga, arrimo la xiriiro tiyaatarka, barnaamijyada qalin-jebinta, barnaamijyada isboortiga, iwm. Xogaha tusaha ayaa sidoo kale lala wadaagi karaa militariga yimaado iskoolka, maktabadaha dadweynaha ee Minnesota (lambarka aqoonsiga ardayga), gaadiidka basaska ee Metro Transit (lambarka aqoonsiga ardayga), iyo Xafiiska Waxbarashada Sare ee Minnesota (lambarka aqoonsiga MARSSS ee ardayga iyo jinsiga). Waalidiinta/mas'uulka sharciga ah ee raba in laga joojiyo bixinta xogta liiskan waa in ay qoraal ku ogeysiyaan Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul ugu dambeyn Septembar 30, 2024.

**Wixii xog dheeraad ah iyo/ama si aad u heshid dokumentiyada ogeysiiska iyo foomamka joojinta fidinta xogtan,** fadlan booqo [spps.org/studentrecords](https://spps.org/studentrecords) ama wac 651-632-3764.

## 2024-2025 Back to School Forms

Student ID: \_\_\_\_\_ Student Last Name \_\_\_\_\_ Student First Name \_\_\_\_\_ Grade \_\_\_\_ Birth Date \_\_\_\_\_ Current School \_\_\_\_\_

### **Sida loo isticmaali doono xogaha meesha lagaala soo xiriiri**

Marka laga tago in lagu soo ogeysiinayo xaaladaha degdegga ah, waxaad xogo ka heli doontaa degmada, iskoolkaaga iyo macallimiinta ardaygaaga iyadoo kuu soo dirayo iimayl, cod duuban iyo/ama farriinta taleefanka ee qoraalka ah. Intaas waxaa sii dheer, degmada SPPS waxay la shaqeysaa bixiyeyaasha adeegyo kala duwan kuwaas oo si toos ah iimaylkaaga kuugu soo diri doona xogo. Bixiyeyaasha adeegyadaas waxaa ka mid ah Peachjar, Schoology, Securly Home, Seesaw, Smore, iyo Xello. Waxaad ka bixi kartaa helitaanka ogeysiisyadan wakhti walba ee aad go'aansatid. Ka baro wax badan oo ku saabsan aaladahaan oo gal [spps.org/families](https://spps.org/families).

### **SECURLY**

SPPS waxay isticmaashaa barnaamijka kala shaandheynta intarnedka oo la yiraahdo Securly si ardayda ugu badbaaddo adeegsiga intarnedka markay iPadkooda ku isticmaalayaan iskoolka iyo gurigaba.

Waaliddiinta App-kan la dhaho Securly Home waxay ku soo degsadaan taleefankooda ama aaladda shakhsi ahaaneed si ay u arkaan dhaqdhaqaaqa khadka onlaynka ee ardayga markuu isticmaalayo iPadka iskoolkiisa, si ay u helaan digniinaha haddii ay ilmuhu arkaan wax welwel keeni karo, iyo si ay ilmaha uga joojiyaan gelitaanka intarnedka ee i-Padkooda marka ardaygaagu uusan joogin iskoolka.

Fiiro gaar ah: "Hab ah Qarinta Xogaha oo La sii Hagaajiyay" ayaa lagu daray Securly Home. Hagaajinta Habka Qarinta Xogta ayaa wuxuu qariyaa xogo gaar ah si ay si fiican loogu ilaaliyo asturnaanta xogta ardayga u gaarka ah. Wixii xog dheeraad ah ee ku saabsan Habka Qarinta Xogta ee La sii Hagaajiyay, booqo [bit.ly/3Ox5hih](https://bit.ly/3Ox5hih).

Wixii xog dheeraad ah ee ku saabsan Securely Home ama taageerada ku aaddan furidda akoonkaaga, booqo [spps.org/ts](https://spps.org/ts).

### **Xogta Foomka 506 ee Waxbarashada Hindida Mareykanka**

#### **Xogta Foomka 506 ee Waxbarashada Hindida Mareykanka**

Foomkani waa diiwaanka rasmiga ah ee lagu go'aamiyo u-qalmitaanka cunug walba shakhsi ahaan kaasoo ka mid ah u tixgelinta ardayga ee Barnaamijka Deeqda Waxbarashada Hindida Mareykanka ee Title VI Indian Education Formula Grant Program. Haddii aad dooratid inaad foom soo gudbisid, ilmahaaga waxaa loo texgelin karaa helidda maalgelinta intuu ku jiro barnaamijka. Haddii loo baahdo, qof ka socda xafiiskeenna ayaa kula soo xiriiri doono si loo caddeeyo xogaha. Waa kan lifaaqa: <https://docs.google.com/forms/d/192FCXABdf63AD7YRp-wETIb1dGwyELLNJhAGdiWpWek/prefill>

Fadlan kala xiriir Kalkaalisada Iskoolka ee Laysinka leh (LSN) wixii ku saabsan wixii walaac caafimaad ah ee saameynaya waxbarashada, oo una baahan in daawo lagu qaato iskoolka, ama leh walaac awood u leh inay ka dhalato xaalad degdeg ah.

<https://www.spps.org/about/departments/health-wellness>

## 2024-2025 Back to School Forms

Student ID: \_\_\_\_\_ Student Last Name \_\_\_\_\_ Student First Name \_\_\_\_\_ Grade \_\_\_\_ Birth Date \_\_\_\_\_ Current School \_\_\_\_\_

### Helitaanka Internetka ee Guriga

Fadlan geli akhbaarta soo socota iyadoo ku salaysan sida aad u isticmaasho aaladaha korontada ah si aad u sameysto shaqada iskuulka guriga. Aftidani waxa ay isticmaashaa ciwaanka aad na siisay ee "gurigaaga." Waa inaad ka jawaabto su'aalaha hoose adigoo ku salaynaya kaliya uun xaaladaha ka jira ciwaankan.

1. Ardaygu ma isticmaalaa aalado koronto ku shaqeeya sida kumbuyuutar, loox (tablet) ama telefan casri ah (smart phone) si uu u sameeyo shaqada iskuulka?

Haa  Maya

Hadii aad haa tiri, aalad koronto ku shaqeysa oo caynkee ah ayuu ardaygu inta badan isticmaalaa si uu u sameeyo shaqada guriga?  Kan miiska mise kan Dhabta la saaro  Loox (Tablet)  Chromebook  Telefanka Casriga ah (smart phone)  Kuwo kale

2. Ardaygu ma ka geli karaa shabakada (internet) aalada korontada ku shaqeysa isagoo guriga jooga?  Maya – Shabakada (internet) lagama heli karo guriga  Maya – Shabakada (internet) lagama heli karo guriga  Maya– Kuwo kale  Haa

Haddii aad haa tiri, adeeg shabakeed (internet) oo caynkee ah ayaad guri ku haysataa?

Cable, DSL, Fiber  Cellular Network  School-Provided Hotspot  Satellite  Dial-Up  Other  I Am not sure

3. Ardaygu ma ka qulqulin karaan fiidow aaladiisa korontada ku shaqeysa hakin la'aan?  Haa  Maya

### MIGRANT

Saddexdii sano ee la soo dhaafay adiga ama qof qoyskaaga ka mid ah ma guuray (magaalada, gobolka ama degmada iskoolka) si adiga ama xubin qoyskaaga ka mid ah ay u shaqeeyaan ama aad u raadsadaan shaqo xilliyo ku eg ama shaqo ku meel gaar ah, mid beeraha ah ama mid kalluumeysi? Kuma jiraan inaad dooneysid magangelyo ama inaad si ebed ah ugu noolaatid MN.

Haa  Ma hubo  Maya

## 2024-2025 Back to School Forms

Student ID: \_\_\_\_\_ Student Last Name \_\_\_\_\_ Student First Name \_\_\_\_\_ Grade \_\_\_\_ Birth Date \_\_\_\_\_ Current School \_\_\_\_\_

### **Naynaasta/Magaca Shaashadda**

*Naynaasta/Magaca Shaashadda ka muuqanayo waa midka ilmahaaga loogu yeeri doono markuu ku jiro goobaha waxbarasho ee SPPS iyo markuu isticmaalayo aaladaha khadka intarnetka.*

*Naynaasta/Magaca Shaashadda:* \_\_\_\_\_

### **RACE ETHNICITY**

Haddaad rabto inaad wax ka baddasho la xiriir Waaxda Meelaynta Ardayda 651-632-3700.

**Minnesota Department of Education - Ethnic and Racial Demographic Designation 4/8/2019**

**Select applicable subcategory(s) if provided the option.**

**Ardaygu ma Isbaanish/Laatiin sida ay qayxeeso dawlada federaalka?** Qeexida dawlada federaalka waxaa ka mid ah qofkii ka soo jeeda Kubaan, Meksikaan, Boorto Rikaan, Koonfur ama Dhexda Mareekanka, ama dhaqamada Isbaanishka kale ama asal, iyadoo loo eegaynin jinsiyada.

Note: Wa in aad kala doorata suaashan "ha" ama "maya".

**Hadi haa** tahay jawaabta, dooro dhammaan kuwa ku taxan liiska hoos ku qoran.

Haa  Maya

Optional Question: If Yes was chosen above, select all that apply from the list below (this question will not be answer by school staff):

- |   |   |   |   |   |
|---|---|---|---|---|
| <input type="checkbox"/> Diid inaad sheegto | <input type="checkbox"/> Kolombiyaan    | <input type="checkbox"/> Ekuwadooriyaan               | <input type="checkbox"/> Guwatemaalan           | <input type="checkbox"/> Meksikaan              |
| <input type="checkbox"/> Boorto Rikaan      | <input type="checkbox"/> Saalvadoriyaan | <input type="checkbox"/> Isbaanish/Isbaanish Mareekan | <input type="checkbox"/> Isbaanish/Laatino kale | <input type="checkbox"/> Isbaanish/Laatino kale |

**Ardaygu ma wuxuu isku aqoonsan yahay in uu yahay Hindida Mareekanka ama Asal ahaan ka soo jeeda Alaska sida uu qeexay gobolka Minnesota?** Qeexidda Gobolka Minnesota waxaa ku jira shaqsiyaadka ee asal ahaan ka soo jeeda dadkii hore u degenaa Woqoyiga Mareekanka oo sii waday aqoonsiga dhaqankooda iyagoo u maraya qabaaalka ama aqoonsiga beesha. [Su'aashan waa loo baahan yahay si loo xisaabiyo maalgelinta ama caawinaada gobolka.]

**Hadi haa**, tahay jawaabta, dooro dhammaan kuwa ku taxan liiska hoos ku qoran.

Haa  Maya

Optional Question: If Yes was chosen above, select all that apply from the list below (this question will not be answered by school staff):

- |   |   |                                   |  |   |  |
|---|---|-----------------------------------|--|---|--|
| <input type="checkbox"/> Diid inaad sheegto | <input type="checkbox"/> Anishinaabe/Ojibwe | <input type="checkbox"/> Cherokee | <input type="checkbox"/> Dakota/Lakota | <input type="checkbox"/> Qabailada kale ee woqooyiga Mareekanka | <input type="checkbox"/> Lama garanayo |
|---|---|-----------------------------------|--|---|--|



## 2024-2025 Back to School Forms

Student ID: \_\_\_\_\_ Student Last Name \_\_\_\_\_ Student First Name \_\_\_\_\_ Grade \_\_\_\_ Birth Date \_\_\_\_\_ Current School \_\_\_\_\_

**Ardaygu miyuu yahay Hindi Mareekan ka soo jeeda Laatiin Ameerika?**  Haa  Maya

**Ardayga ma Asiyaan baa sida ay qeexayso dawlada federaalka?** Qeexida federalka waxaa ka mid ah qofkii asal ka soo jeeda Bariga Fog, Koonfurta Bariga Aasiya, ama Hindiya ay ka mid yihiin wadamada Combodia, China, India, Japan, Korea, Malaysia, Pakistan, the Philippine Islands, Thailand, and Vietnam.

**Hadi haa,** tahay jawaabta, dooro dhammaan kuwa ku taxan liiska hoos ku qoran

Haa  Maya

Diid inaad sheegto  Hindi Aasiyaan  Burmiis  Shiinees  Filibiin  Moong

Karen  Kuuriyaan  Fiyaatnamiis  Aasiyaan kale  Lama Garanayo

**Ardayga ma madow baa ama Mareekan Afrikaan ah sida ay qayxeeso dawlada federaalka?** Qeexida dawlada federalka waxaa ka mid ah qofkii ka soo jeeda asal ahaan kooxaha jinsiyada Madow ee Afrika.

**Hadi haa,** tahay jawaabta, dooro dhammaan kuwa ku taxan liiska hoos ku qoran.

Haa  Maya

Diid inaad sheegto  Mareekan Afrikaan  Itoobiyaan-Oromo  Itoobiyaan-kale  Laybeeriyaan

Nayjeeriyaa  Soomaali  Madow Kale  Lama Garanayo

**Ardaygu ma Hawaiyaan Dhalad ah ama Kuwa ka soo jeeda Jasiiradaha Baasifiga sida ay qeexayso dawlada federaalka?**

Qeexida dawlada federaalka waxaa ka mid ah dadka soo jeeda asal ahaan Hawaaii, Guam, Samowa, ama Jasiiradaha Baasifiga kale.

Haa  Maya

**Ardayga ma Cadaan baa sida ay qayxeeso dawlada federaalka?**

Qeexida dawlada federaalka waxaa ka mid ah dadka ka soo jeeda Yurub, Bariga Dhexe ama Woqooyiga Afrika.

Haa  Maya

2024-2025 Back to School Forms

Student ID: \_\_\_\_\_ Student Last Name \_\_\_\_\_ Student First Name \_\_\_\_\_ Grade \_\_\_\_ Birth Date \_\_\_\_\_ Current School \_\_\_\_\_

Guryaha

Si aan u aqoonsano uguna adeegno ardayda ay hoy la'aantu hayso ee degmadeena, fadlan soo buuxi macluumaadkan qarsoodiga ah ee soo socda.

Place an X in the appropriate box to answer "Yes" or "No"
1. Qoyskaygu waxay ku noolyihiin hoyga xaaladaha degdegga ah , hoyga qoysaska qaba dhibaataada ku-xadgudubka guriga ama hoyga ku-meelgaarka ah. [ ] Haa [ ] Maya
2. Qoyskaygu waxay SI KU MEELGAAR AH guri ugula noolyihiin in ka badan hal qoys, guriga guura, ama (apartment) maadaama oo qoyskayga la raray guriga, ama ay guriga ku waayeen dab ama khasaare kale. [ ] Haa [ ] Maya
3. Qoyskaygu waxay ku noolyihiin gaariga dhexdiisa, goobaha banaan ee dadweynaha. [ ] Haa [ ] Maya
4. Qoyskaygu waxay ku noolyihiin hotel ama motel [ ] Haa [ ] Maya
5. Cunugga aan diiwaan gelinayo wuxuu deggan yahay guri korriimo (foster care) [ ] Haa [ ] Maya
6. ICunugga aan diiwaan gelinayo wuxuu deggan yahay guri korriimo (foster care) [ ] Haa [ ] Maya
7. Waxaan hadda la shaqeeyaa/iga-war-haya shaqaalaha Project REACH. [ ] Haa [ ] Maya

Ardayda ku nool daryeel xanaano oo ay maxkad go'aamisay, ama xeryaha kabidda dhalinyarada (juvenile corrections) waxay xaq u leeyihiin diiwaangalin deg deg ah wayna sii wadan karaan iskuulkii ay dhiganayeen xilliga lagu meeleeeyay daryeelka xanaano. Haddii aad diiwaangalinayso arday ku nool daryeel xanaano, fadlan buuxi qeybtan hoose.

If you are registering a student living in out of home care/foster care, please complete this section below: Place an X in the appropriate box to answer "Yes" or "No."
1. Ardayda ku nool daryeel xanaano oo ay maxkad go'aamisay, ama xeryaha kabidda dhalinyarada (juvenile corrections) waxay xaq u leeyihiin diiwaangalin deg deg ah wayna sii wadan karaan iskuulkii ay dhiganayeen xilliga lagu meeleeeyay daryeelka xanaano.? [ ] Haa [ ] Maya
Haa...
Ardaygu xagee buu iskuul ka dhiganayey xilliga uu ku jiray meelaynta daryeelka xanaanada ee ka baxsan gurigooda?
\_\_\_\_\_
If this student is living in court ordered out of home care/foster care:
Type of Placement: \_\_\_\_\_
County-ga Meelaynaya: \_\_\_\_\_
Magaca Shaqaalaha County-ga \_\_\_\_\_
Taleefanka Shaqaalaha \_\_\_\_\_
By indicating YES to any of the above questions, you may meet eligibility requirements to qualify for services from the Fostering Connections in Saint Paul Public Schools.

**2024-2025 Back to School Forms**

Student ID: \_\_\_\_\_ Student Last Name \_\_\_\_\_ Student First Name \_\_\_\_\_ Grade \_\_\_\_ Birth Date \_\_\_\_\_ Current School \_\_\_\_\_

**MILITARY CONNECT**

Ma jirtaa cid qoyskaaga ka tirsan, sida waalidkaa ama walaalkaa/walaashaa oo hadda ka tirsan ciidanka milatariga, ama ku jira ciidanka keydka, ama xilli dhow hawl-gab noqday (Army, Navy, Air Force, Marines, iyo/ama Coast Guard).

Haa  Maya

**Haa,,** Dooro xiriirka idinka dhexeeya adiga iyo xubinka ciidanka ah: Waalid Waalaalaha

Qor magaca xubinka ciidanka ah \_\_\_\_\_

Dooro qeybta ciidanka ee uu ka tirsanyahay Army Navy Air Force Marines Coast Guard

*Iyadoo loo hoggaansamayo Qaanuunka Minnesota ee 127A.852. Si aad hesho macluumaadka Waaxda Waxbarashada ee Minnesota ee ay u baahanyihiin qoysaska ciidanka milatariga ah, booqo <https://education.mn.gov/MDE/fam/mil/>.*

## 2024-2025 Back to School Forms

Student ID: \_\_\_\_\_ Student Last Name \_\_\_\_\_ Student First Name \_\_\_\_\_ Grade \_\_\_\_ Birth Date \_\_\_\_\_ Current School \_\_\_\_\_

### 2024/2025 Fasaxyada (ALL GRADES)

To view the permissions and releases below in detail go here,

[https://docs.google.com/document/d/1N\\_I7ev2DeWNPpIS3-VRSZI6A-9sBt\\_ObLX5I9AQqK1E/edit?usp=sharing](https://docs.google.com/document/d/1N_I7ev2DeWNPpIS3-VRSZI6A-9sBt_ObLX5I9AQqK1E/edit?usp=sharing)

#### **Heshiiska – Ku saabsan safarrada waxabarshada /Field Trip**

Waan oggolahay in ilmahaygu ka qaybgalo safarada waxbarasho (field trips) ee nooca linta lagu jiro sanad-dugsiyeedka 2024/2025.

**Haa**, I give permission for my child to participate in Type I field trips for the 24/25 school year.

**Maya**, I do not want my child to participate in Type I field trips for the 24/25 school year.

#### **MEDIA RELEASE**

Shaqaalaha Dugsiyada Dadwaynaha Saint Paul, ururada bulshada iyo xubno matalaya is-gaarsiinta ayaa laga yaabaa inay xog-waraystaan, sawiraan, ama fiidiyow ka duubaan ilmahaaga si ay ugu isticmaalaan jaraa' idka, warbixinta talefishinka, akhbaarta dadwaynaha loo soo bandhigayo iyo internet-ka. Sawirada waxaa laga yaabaa inay ka koobnaadaan koox arday ah ama ardayga kaligii, isla markaana waxaa laga yaabaa in ardayda magacyadooda la isticmaalo. Si' loo ilaaliyo xuquuqda ardayda internet-kana ay uga nabad galaan, sawirka ardayga iyo magaciisa isku mar laguma daabacayo ama ku soo wada bixi maayaan baraha internet-ka ee iskuulka ama Degmada.

Options:

**Yes:** Waxaan fasaxayaa in ilmahayga la sawiro oo xog-waraysi lala yeesho; waxaa kale oo aan fasaxayaa in ilmahayga magaciisa la isticmaalo.

**Partial:** Waxaan fasaxayaa in ilmahayga la sawiro, laakiin ma doonayo in ilmahayga magaciisa iyo sawirkiisa la isla isticmaalo.

**No:** Ma doonayo in ilmahayga la sawiro ama xog-waraysi lala yeesho, mana doonayo in magaciisa la isticmaalo.

**Please check one:**

- Haa
- Qayb Ahaan
- Maya

**Heshiiska Isticmaalka Tignoolajiyada ee Ardayda**

## 2024-2025 Back to School Forms

Student ID: \_\_\_\_\_ Student Last Name \_\_\_\_\_ Student First Name \_\_\_\_\_ Grade \_\_\_\_ Birth Date \_\_\_\_\_ Current School \_\_\_\_\_

Dugsiyada Dadwaynaha ee Saint Paul waxay ardayda siiyaan fursad u sahlaya in ay tignoolajiyada casriga ah (technology) u adeegsadaan waxbarshada. Ardayda waxaa laga rabaa in ay raacaan ooy ilaaliyaan qawaaniinta iyo xeerarka maamulka degmada, shuruucda kale ee wehelisa, iyo nidaamka si ay usii helaan fursada adeegsiga tignoolajiyada.

**Ardaydu** waxay fahamsanyihiin ooy ogyihiin isticmaalka qalabka iyo tignoolajiyada degmadu inuu yahay wax ay waayi karaan. Waxaa kale oo ay fahamsanyihiin haddii ay raaci waaye

### Select Haa or Maya.

Haa  Maya

### OGEYSIIS IYO OGGOLAANSHAHA LACAG-CELINTA LA XIRIIRTO ADEEGYADA CAAFIMADKA IYO SIIDDEYNTA XOGAHA DIIWAANKA KU JIRO

Waalidka/Mas'uulka Qaaliga ah:

Horudhac: Degmooyinka dugsiyada Minnesota waxay kharashka caymisyada ka raadsan karaan caymis-bixiyaasha iyo qolada saddexaad ee caymis-bixiyaasha la mid ah markii ay iskoolladu ardayga siiyaan adeegyo caafimaadka ku salaysan. Adeegga caafimaadka ee la xiriira barnaamijka IEP waxaa ku jirikara qiimaynta/baaritaanka iyo adeegyada la xiriira hadalka/luuqada/maqalka, dabiibka taageerada tamarta shaqada, dabiibka caafimaadka jirka, kalkaalisada caafimaadka, kaalmaada xanaanada qofka, aalada teknoolojida wax caawisa, adeega tarjumaanada, gaadiidka khaaska ah ee qaadaya adeega caafimaadka maskaxda. Ogeysiiskan iyo ogolaanshaha lacag-celinta ayaa lagu dabaqi doonaa adeegyada la xiriira caafimaadka ee ay helaan ardayda haddii ay ku jiraan ama aysan ku jirin barnaamijyada IEP (Qorshaha Waxbarashada Shaqsiga u Gaarka ah)/IFSP (Qorshaha Adeegga Qoyska ee Gaarka ah). Degmadu waa inay heshaa ogolaanshahaaga si ay caymisyada iyo qolada saddexaad ee la mid ah caymis-bixiyaasha uga raadsato lacag-bixinta la xiriirto adeegyada caafimaadka.

Ujeedada ogaysiiskan/foomkaan waa:

- Inaan kuu soo diro wargalin ama ogaysiis arinta ku xasuusinaysa
- Inaan helo saxiixaaga ama ogolaanshahaaga aad noogu tanaasulayso inaan akhbaarta cunugaaga bixino si naloo ku soo celiyo Adeega Caafimaad ee barnaamijka IEP iyo adeega la xiriira

Wargalin:

- Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul waxay lacag-celin ka doonan doonaan caymisyada iyo qolada saddexaad ee la midka ah (sida Medical Assistance (MA) ama MinnesotaCare (MC))) ee ku aaddan adeegyada la xiriira caafimaadka iskoolka ee ilmahaagu ka helo (ama ha lahaado ama yuusan lahaan IEP/IFSP).
- Degmadu waxay ku siin doontaa ogeysiin sannadle ah oo ku saabsan qasadkeenna aan ku raadineyno lacag-celinta adeegyada la xiriira caafimaadka.
- Adeegyada caafimaad ee la xiriira IEP/IFSP, ma JIRIDOONAAN wax kharash ah oo qoyskaaga saaran arintaanina wax saamayn ah KU YEELAN MAYSO caymiskaaga MA/MC, oo ay ku jiraan TEFRA, waived programs, adeega xadidan ama xuduuda leh.
- Degmada shardi kuma aha inay kaa saxiixdo waxyaabaha ay ka doonayaan MA/MC.
- Waxa aad xaq u leedahay in aad heshid nuqul ah diiwaanka waxbarasho ee ay degmadu la wadaagto cid kasta oo saddexaad (tusaale: Waxsaarada Minnesota Department of Human Services (DHS) iyo Wasaarada Caafimaadka iyo Adeegga Dadka ee Doowlada Maraykanka United States Department of Health and Human Services (DHHS)).
- Waxaad ka noqon kartaa oggolaanshihi aad horay u samaysan si qoraal ah iyada oo loo marayo [thirdpartyconsent@spps.org](mailto:thirdpartyconsent@spps.org) markasta oo aad doonto ayadoo aanay waxba aanay u dhimayn adeega caafimaadka cunugaaga. Burintaas dib loogama laaban karo.

## 2024-2025 Back to School Forms

Student ID: \_\_\_\_\_ Student Last Name \_\_\_\_\_ Student First Name \_\_\_\_\_ Grade \_\_\_\_ Birth Date \_\_\_\_\_ Current School \_\_\_\_\_

Macluumaad dheeraad ah:

- Carruurta da'doodu tahay 3 ama ka weyn waxaa oggolaanshaha lagu heli karaa foomka oggolaanshaha ee degmada SPPS, ama (marka ay khusayso) Foomka diiwaangelinta/dib-isu-diiwaangelinta Minnesota Health Care Program (MHCP) ee kaalmada caafimaadka ama MinnesotaCare -- waase haddii: (1) aad buuxisay foomka diiwaangelinta/dib-isu-diiwaangelinta MHCP ee kaalmada MA ama MC; (2) haddii Degmadu ay ku siisay ogeysiis qoraal oo sannadle ah; iyo (3) haddii hal sano ay ka soo wareegtay markii ay (1) iyo (2) labaduba dhaceen.
- Degmada Saint Paul Schools wax kharash ah ku dalici mayso caymiskaaga gaarka ah. Haddii aad leedahay caymis isku jira oo ka kooban MA/MC iyo caymis aad gaar u leedahay waxaan diidmo gobolka oo dhan ku baahsan ka helaynaa Wasaarada Tacliinta ama Minnesota Department of Education (MDE) ama kambaniga caymiskaaga qaabilsan inta aanan biilka u dirin MA/MC.

Waxaan kuugu tahniyadaynaynaa taageeradaada iyo iskaashiga aad nala samaynayso. Haddiise aad wax su'aal ah qabto waxaad wici kartaa 651-767-8189.

